## Sida loo codsado rafcaan qaadashada

Haddii daryeelkaaga urruradu iska kaashadeen (CCO), qorshaha ilkaha ama qorshaha caafimaadka dhimirku ay diidaan adeeg aad isleedahay waxay ahayd in caymiskooda la bixiyo, waxaad codsan kartaa rafcaan. Si aad tani u samayso:

- Buuxi boggaga 3 iyo 4 ee foomkan. U soo celi xafiiska CCO-gaaga ama qorshaha, ama
- CCO-gaaga ama qorshahaaga kula xiriir telefoon ahaan, warqad ahaan ama fax ahaan. Haddii aad rafcaan ku codsato telefoon ahaan, isla markaana aadan u baahnayn dacwad dhageysiga degdeg ah, waa in aad sidoo kale ku codsato qoraal ahaan.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo tani, Waaxda Adeega Macmiilka ee CCO-gaaga ama qorshahaaga ka socdo caawimaad.

### Wakhtiga loo qabtay

CCO-gaaga ama qorshahaagu waa in ay codsiga rafcaankaaga ku helaan muddo 60 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda ka muuqata bogga koowaad ee *Ogaysiinta Talaabo qaadida "Notice of Action"* (warqada aad hesho ee ku saabsan go'aanka diidmada).

Haddii aad ku codsato wakhtigan loo qabtay ka dib, waa in aad muujisaa in aad haysato sabab fiican oo loola soo daahay.

### Maxaa dhacaya haddii aan codsado rafcaan?

Kalkaaliso ama dhakhtar kale oo ka socda CCO-gaaga ama qorshahaaga ayaa dib u eegi doona codsiga adeega, iyo dhammaan macluumaadka ku jira codsiga rafcaankaaga.

- Dib u eegistani waxay gacan ka geysan doontaa haddii ay tahay in go'aanka diidmada la bedelo.
- Waxaad xaq u leedahay in aad aragto dhammaan macluumaadkan ka socda dib u eegistani ka hor inta aanay go'aanka gaarin (la xiriir Waaxda Adeega Macmiilka ee CCO-gaaga ama qorshahaaga si aad u weydiiso arrintani).
- Adiga iyo dhakhtarkaagu waxaad sidoo kale CCO-gaaga ama qorshahaaga macluumaad dheeraad ah u siin kartaa, qof ahaan ama qoraal ahaan, si aad uga caawiso go'aan ay gaaraan.

Muddo 16 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda codsigaaga, CCO-gaaga ama qorshahaagu waxay kuu soo diri doonaan *Ogeysiinta Xallinta Rafcaanka*si ay kuugu sheegaan go'aankooda.

### Maxaa dhacaya haddii adeega weli la diido?

Haddii, rafcaanka ka dib, CCO-ga ama qorshuhu aanu beddelin go'aankoodii diidmada, waxaad OHA ka codsan kartaa dacwad dhageysi.

## Sida loo codsado dacwad dhageysi

Haddii aad codsatay rafcaan isla markaana aanad ku raacsanayn go'aanka rafcaanka ee CCO ama qorshaha, waxaad OHA ka codsan kartaa dacwad dhageysi. Si aad tani u samayso:

- Buuxi boggaga 3 iyo 4 ee foomkan. U soo celi OHA ama xafiiska Waaxda Adeegyada Dadweynaha Oregon (ODHS); **AMA**
- Foom ka buuxi dhanka internet-ka bit.ly/ohp-hearing-form; **AMA**
- Buuxi oo soo celi foomka Codsiga Dhegeysiga Maxkamadeed (Administrative Hearing Request (MSC 443). Si aad u hesho foomkan isla markaana u hesho caawimo la xiriirta buuxinta foomka, booqo xafiiska ODHS ama wac 800-273-0557 (TTY 711).

Waxaad sidoo kale foomkan ka heli kartaa **OHP.Oregon.gov** (riixda halka ay ku qoran tahay "Forms").

### Wakhtiga loo qabtay

OHA waa in ay codsigaaga ku heshaa muddo 120 maalmood gudahood laga soo bilaabo taariikhda *Ogeysiinta Xallinta Rafcaanka 'Notice of Appeal Resolution'*(warqada aad hesho ee ku saabsan rafcaanka).

Haddii aad ku codsato wakhtigan loo qabtay ka dib, waa in aad muujisaa in aad haysato sabab fiican oo loola soo daahay.

**Maxaa dhacaya haddii aan codsado dacwad dhageysi?**

Dacwad dhageysiga ka hor, xubin ka mid ah shaqaalaha OHA ayaa ku wici doona si uu kaaga codsado macluumaad dheeraad ah isla markaana ka jawaabi doona su'aalahaaga.

Dhageysiga maxkamadda, waxaad sheegi kartaa sababta aadan kula raacsaneyn go'aanka. Dacwad dhageysiga badankooda waxaa lagu qabtaa iyada oo la isticmaalayo telefoonka. Dadkani waxay sidoo kale joogi doonaan halkaasi:

- Wakiilka dhageysiga dacwada ee OHA
- Qof ka socda CCO-gaaga ama qorshahaaga
- Wakiilkaaga ama caawiyahaaga (haddii aad mid leedahay)
- Garsooraha maamulka maxkamadda
- Wixii markhaatiyaal ah ee aad martiqaado

Dacwad dhageysiga ka dib garsooraha ayaa dib u eegi doona macluumaadka lagu soo bandhigay dacwad dhageysiga isla markaana go'aan gaari doona. Waxaad muddo 30 maalmood gudahood ah ku heli doontaa *Soo jeedinta iyo Amarka kama Dambeysta ah* (go'aanka garsooraha.

Dacwad dhageysigu waxay raacdaa Xeerka Nidaamka Maamulka, Xeerka La Casriyeeyay ee Oregon (ORS) Qodobka 183, iyo Xeerarka Maamulka Oregon 137-003-0501 ilaa 0700, 410-120-1860, 410

## Waxaad u baahan tahay in aad ogaato ka hor inta aadan codsan rafcaan ama dacwad dhageysi.

Halkan waxaa ku qoran laba waxyaabood oo aad mar kasta sameyn karto, oo dheer codsashada la codsanayo rafcaanka ama dacwad dhageysiga. **Kuma** siin doonto waqti dheeraad ah oo aad ku codsato rafcaan ama dacwad dhageysi, sidaa darteed waa in aad isla markiiba samaysaa:

1. Waxaad dhakhtarkaaga weydiin kartaa siyaabo kale oo xaaladaada xanuun lagu daaweeyo.
2. Waxaad codsan kartaa macluumaadka loo isticmaalay si go'aankan loo gaaro. Si aad tani u samayso, wac lambarka Adeega Macmiilka ee loogu talagalay CCO-gaaga ama qorshahaaga.

**Sii wadida adeega**

Haddii aad helaysay adeeg **ka hor** inta aanay CCO qorshuhu diidin iyada, waxaad sii codsan kartaa in aad hesho iyada inta aadka sugayso rafcaanka ama dacwad dhageysiga. Si aad tani u samayso, waa in aad:

- Calaamadeysaa "Haa" Su'aasha 8 ee ku qoran bogga 4 ee foomkan, isla markaana
- Rafcaanka ku codsataa muddo aan ka dambeyn 10 maalmood ka dib "Taariikhda Ogaysiinta" ee ka muuqata *Ogaysiinta Talaabo qaadida "Notice of Action"* ama "taariikhda dhaqangalka" (haddii ogaysiinta ay ku qoran tahay "taariikhda dhaqangalku"), hadba tii dambaysa isla markaana
- Dacwad dhageysiga ku codsataa muddo aan ka dambeyn 10 maalmood ka dib "Taariikhda Ogaysiinta" ee ka muuqata *Ogeysiinta Xallinta Rafcaanka* ama "tariikhda dhaqangalka" (haddii ogaysiinta ay ku qoran tahay "tariikhda dhaqangalku"), hadba tii dambaysa.

Haddii rafcaanka ama dacwad dhageysigu aanu waxba ka bedelin go'aanka la gaaray, waxaa suurta gal ah in aad bixiso kharashka adeegyada aad hesho muddo ku beegan ama ka dib taariikhda dhaqangalka ee *Ogaysiinta Talaabo qaadida "Notice of Action"* ama *Ogeysiinta Xallinta Rafcaanka*.

**Haddii aad caawimaad u baahan tahay marka aad joogto rafcaankaaga ama dacwad dhageysigaaga:**

Waxaad socdan kartaa saaxiib, xubin ka tirsan qoyska, qof ku taageera, dhakhtar ama qareen ku caawiya marka aad joogto rafcaanka ama dacwad dhageysiga. The CCO ama qorshaha ayaa go'aamiya cidda joogi doonta rafcaankaaga. Haddii aad rabto qareen, waxaad caawimaad ka codsan kartaa:

- Khadka Gargaarka Dadweynaha ee 800-520-5292 (TTY 711), si aad u hesho talo iyo qofka kaa noqda wakiil. Adeegyada Gargaarka Sharciga ee Oregon iyo Xarunta Sharciga Oregon ayaa bixiya khadkan.
- Ururka Qareennada Gobolka Oregon ee 800-452-8260, si aad wax uga ogaato adeegyo dhinaca sharciga ah oo lacag la'aan ah ama qiimahoodu jaban yahay.

Haddii aad rabto qof wakiil kaa noqda marka la joogo dacwad dhageysiga, macluumaadka lagala xiriirayo nagu sii foomkan ama foomka MSC 443, ama u sheeg wakiilka dhageysiga dacwada ee OHA.

**Haddii uu codsigaagu soo daaho ama la joojiyo, ama aadan imaanin dacwad dhageysigaaga:**

**Waxaad lumin kartaa xuquuqda aad u leedahay racfaanka ama dacwad dhageysiga ee ku saabsan go'aankani.** Haddii tani ay dhacdo, go'aankii u dambeeyay ee ogaysiinta ee ka socda CCO-gaaga ama qorshahaaga wuxuu noqon doonaa go'aanka kama dambeysta ah (ama "amarka caadiga ee kama dambeysta ah"). Wuxuu mid dhaqangal ah noqon doonaa 120 maalmood ka dib taariikhda ogeysiinta. Ma heli doontid ogaysiisyo kale oo ku saabsan go'aankani. Diiwaanka amarka kama dambeysta ah waa faylka kiiska ee loo isticmaalay si loo gaaro go'aanka, oo ay la socdaan wixii aad bixiso mar dambe.

**Haddii aad joojiso codsigaaga dacwad dhageysiga ama aadan imaan dacwad dhageysigaaga,** waxaad heli doontaa ammarka ka joojinta. Waxaad weli rafcaan ka qaadan kartaa go'aanka iska joojinta sida uu dhigayo ORS 183.482 adigoo codsi rasmi ah u soo gudbinaya Maxkamadda Rafcaanka ee Oregon. Waa in aad tani ku sameysaa muddo 60 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda ammarka ka joojinta. Ammarka joojintu wuxuu kuu sheegi doonaa wakhtiga loo qabtay.

**Fariin ku socota dadka ciidamada ka tirsan:** Xeerka Sahlida Dadka Ciidamada ka Tirsan ee federaalka wuxuu xubnaha shaqada ciidan haya siiyaa xuquuqda ay dib u dhigi karaan inta dacwadahani socdaan. Si aad u ogaato waxyaalo dheeraaad ah, la xiriir Ururka Qareennada Gobolka Oregon ee 800-452-8260, Qaybta Ciidamada Oregon ee 503-584-3571, ama xafiiska taageerada sharci ee Ciidamada Qalabka, http://legalassistance.law.af.mil.

**Haddii aad leedahay rafcaan ama dacwad dhageysi isla markaana adeega weli la diiday**

Waxaad dooran kartaa in aad adiga laftaadu bixiso lacagta. Tani wax ka weydii daryeel bixiyahaaga. Adiga iyo daryeel bixiyahaagu waa in aad ka dib saxiixdaan *Heshiiska Bixinta* si ay u muujiso in aad fahamtay in aad bixiso lacagta loogu talagalay aan adeega aan lacagta caymiskooda la bixinin.

Oregon Health Authority
Qaybta Nidaamyada Caafimaadka

| Agency Use Only | | |
|---|---|---|
| Program | Branch | Case Number |
| | | |

# Codso in dib u eegid lagu sameeyo go'aanka daryeelka caafimaad

Buuxi boggaga 3 iyo 4 ee foomkan ama foom ka buuxi dhanka internet-ka bit.ly/ohp-hearing-form.

**Codsiyada rafcaanka u dir:**

CCO-gaaga ama qorshahaaga
(Isticmaal cinwaanka ku qoran Ogaysiinta Talaabo qaadida "Notice of Action" ee ka socota CCO-gaaga ama qorshahaaga)

**Codsiyada dacwad dhageysiga u dir:**

OHA-Medical Hearings
500 Summer St NE E49
Salem, OR 97301-1077 Fax-ka: 503-945-6035

**Nooce codsiga – Calaamadee kaliya mid ka mid ah kuwa soo socda**
(fiiri bogga 1 wixii macluumaad dheeraad ah):

Xubnaha ka tirsan CCO ama qorshe waa **inay** codsadaan rafcaan ka hor inta aanay OHA ka codsan dacwad dhageysi. Codsiga rafcaan ama dacwad dhageysi **ma** saamayn doono u qalmidaada Qorshaha Caafimaadka Oregon. Wax kala doorashadu waa mid aad adigu leedahay.

☐ **Codsiga rafcaankaagu:** Wuxuu ka codsadaa CCO ama qorshahu in ay dib u eegid ku sameeyaan go'aanka diidmada.
*Ku lifaaq nuqulka go'aanka ogaysiinta Ogaysiinta Talaabo qaadida "Notice of Action" (go'aanka ogaysiinta) ee ka socda CCO-gaaga ama qorshahaaga*.

☐ **Codsiga dacwad dhageysigu:** Wuxuu ka codsadaa OHA in ay dib u eegid ku sameyso ama iyo go'aanka diidmada iyo rafcaanka ee CCO ama qorshaha.
*Ku lifaaq nuqulka "Ogeysiinta Xallinta Rafcaanka" (go'aanka rafcaanka) ee ka socda CCO-gaaga ama qorshahaaga.*

**Wax nooga sheeg xubinta heshay diidmada adeega:**

1. Magaca xubinta: ____________ Lambarka Aqoonsiga Macmiilka: ________
   Cinwaanka: ____________
   Magaalada: ____________ Gobolka: ________ ZIP code-ka: ________
   Lambarka telefoonka: ____________ Taariikhda dhalasho: ________
   Lambarka Social Security-ga* *waajib maaha):* ____________
   Luqadda lagu hadlo: ☐ Ingiriisi ☐ Isbaanish ☐ Afka-Ruushka ☐ Vietnamese
   ☐ Kuwo kale: ____________
   Ma u baahan tahay qoraalka oo qaab kale ah? ☐ Haa ☐ Maya
   Haddii ay jawaabtu haa tahay, fadlan si gaar ah u tilmaan:
   **Sharcigu wuxuu Maamulka Caafimaadka Oregon u oggolaanayaa in ay ku weydiiyaan Lambarkaaga Social Security-ga (SSN). Waxaad sharciyadani ka heli kartaa oo ay hoos yimaadaan 42 USC 1320b-7(a) iyo (b), 7 USC 2011-2036, 42 CFR 436.920, iyo 42 CFR 457.340(b). Lagaagama baahna in aad bixiso SSN. Haddii aad leedahay, OHA waxay kaliya u isticmaali doontaa in ay caawimaad ka geysato helida diiwaankaaga iyo keydkaaga.*

2. Qofka xubinta ahi ma leeyahay qof ka caawin doona rafcaanka ama dacwad dhageysiga? Tusaale: saaxiib, xubin ka tirsan qoyska, qof ku taageera, dhakhtar ama qareen. *Haddii aadan mid hada lahayn, waxaad wakhti kasta ku dari kartaa wakiil ka hor rafcaanka ama dacwad dhageysiga*:
   ☐ Maya

☐ Haa, magaca: ______________________________

Cinwaanka, Magaalada,
Gobolka, ZIP-ka: ______________________________

Lambarka telefoonka: ______________________________

**Ayaa buuxiyay foomkan? Wax noog sheeg qofka (haddii uu ka duwan tahay xubinta):**

3. Magaca: ______________________ Lambarka telefoonka: ______________

4. Xiriirka ka dhexeeya qofka xubinta ah: ______________________________

**Wax nooga sheeg codsiga:**

5. Waa maxay adeega(yada) la diiday? Halkan ku qor.

6. Xubintu ma helay go'aanka ogaysiinta oo qoraal ah? Mid calaamaddee:
   - ☐ Haa. Taariikhda ogaysiinta: ______________________________
   - ☐ Maya

7. Qofka xubinta ahi miyuu helayay adeega(yada) ka hor intii aan la diidin?
   - ☐ Haa
   - ☐ Maya

8 Haddii qofka xubinta ahi ee halay adeeg(adeegyo) ka hor intii la diiday, qofka xubinta ahi ma rabaa in uu sii wato helidooda inta lagu jiro nidaamka rafcaanka ama dacwad dhageysiga?
   - ☐ Haa *(ka hor inta aadan calaamadeyn sanduuqan, akhri qaybta Sii wadida Adeega ee ku qoran bogga 2)*
   - ☐ Maya
   - ☐ Aan ku khusaynin: Qofka xubinta ama ma helaynin adeeg(adeegyo) diidmada ka hor.

9. Qofka xubinta ahi hada ma u baahan yahay go'aan rafcaan ama dacwad dhageysiga degdeg ah sababtoo ah iyada oo sugiddu khatar gelin karto nolosha qofka xubinta ah, caafimaadkiisa, ama awoodda uu u leeyahay in uu shaqeeyo?
   - ☐ Maya
   - ☐ Haa. *Fadlan sharax sida sugitaanku waxyeello ugu geysan karo qofka xubinta ah.*

10. Noo sheeg sababta ay CCO ama qorshuhu ay u tahay in ay u bixiyaan adeegani. *Waxaad sidoo kale soo diri kartaa qoraalo iyo diiwaannada caafimaadka si aad noogu sheegto sababta.*

**Saxiixa xubinta (waa mid la iskaga baahan marka la codsanayo rafcaan):**

| Saxiixa xubinta ama wakiilka sharciga ah ee xubinta | Taariikhda |
|---|---|